



UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda oo ku baaqey in la ansaxiyo Hindise-sharciyeedka Xuquuqda Carruurta

Sharci taariikhi ah oo aasaas sharciyeed u noqon doonaa ilaalinta xuquuqaha Carruurta Soomaaliyeed

Muqdisho, Nofembar 20, 2020 – Iyada oo uu adduunku u dabbaal-degayo 31-sano guuradii Heshiiska Xuquuqda Carruurta / *Convention on the Rights of the Child* (CRC), ayaa UNICEF iyo Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ee Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya / *the Ministry of Women and Human Rights Development of the Federal Government of Somalia* (MoWHRD) ay waddaa in ay riixdo ansaxinta Hindise-Sharciyeedka Xuquuqda Carruurta ee hadda horyaalla Golaha Wasiirrada ee Soomaaliya si ay u ansaxiyaan.

“Sharcigan taariikhiga ah waxaa uu aasaas sharciyeed u noqon doonaa kor-uqaadista iyo ilaalinta dhammaan xuquuqaha carruurta jooga Soomaaliya,” ayaa ay tiri Wasiirad Xaniifa Maxamed Ibraahim, MoWHRD. “Carruurta waa jilka soo socda waxaana haddii aan rabno in aan dib-udhisno Soomaaliya, waajib ah in la ilaaliyo mustaqbalka carruurteenna iyada oo la hubinayo xuquuqdooda aasaasiga ah si ay u koraan ayna u baraaraan.”

Soomaaliya ayaa heshiiska CRC saxiixdey sanadkii 2015kii kaas oo ah heshiiska xuquuqda aadanaha ee sida ugu ballaaran loo ansaxiyey dunida oo dhan. Waxaa uu qeexayaa xuquuqaha aadanaha ee aasaasiga ah ee ay carruurta leeyihiin meel kasta oo ay ku nool yihiin. Xuquuqahaas waxaa ka mid ah: xuquuqda ay u leeyihiin in ay si buuxda u kobcaan; xuquuqda ay u leeyihiin waxbarasho; iyo in laga ilaaliyo dhiigmiirasho.

Hindise-sharciyeedka Xuquuqda Carruurta waxaa uu muujinayaa sida ay Dowladda Federaalka uga go’an tahay hubinta in la dhowro qodobbada ku jira CRC.

“Waxaan Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka uga mahadcelineynaa hoggaan-wanaaggeeda ku aaddan sidii loo ansaxin lahaa Hindise Sharciyeedka Xuquuqda Carruurta,” ayaa uu yiri Jesper Moller, oo ah Wakiilka Ku-meelgaarka ah ee UNICEF u jooga Soomaaliya. “Ilmo kasta oo jooga Soomaaliya waxaa uu mudan yahay in uu si buuxda u helo xuquuqdiisa, gaar ahaan xuquuqda ilaalinta iyo waxbarasho. Haddii carruurta ay helaan waxbarasho, oo aaney soo gaarin wax dhibaato ah, waxaa ay heli doonaan xirfadaha iyo aqoonta ay ugu baahan yihiin in ay noqdaan kuwo horseed u ah is-beddel oo gacan ka geysta wax ku biirinta sidii loo heli lahaa bulsho nabadeed.”

Marka uu Golaha Wasiiradu ansaxiyo Hindise-sharciyeedka, waxaa loo gudbinayaa Baarlamaanka si ay uga doodaan ayna u ansaxiyaan. Marka la ansaxiyo, waxaa uu noqonayaa sharcigii ugu ballaarnaa ee diiradda saaraya carruurta ee guud ahaan taaariikhda Soomaaliya.

#####

Ku saabsan UNICEF

UNICEF waxaa ay ka shaqeysaa qaar ka mid ah meelaha ugu adag dunida oo dhan, si ay adeeg u gaarsiiso carruurta ugu saboolsan. 190 dal iyo dhul, ayaan uga shaqeynaa ilmo kasta, meel kasta ha joojee, si aan u dhisno adduun ka sii wanaagsan midka hadda. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan UNICEF iyo hawsha ay u hayso carruurta, booqo www.unicef.org.

Macluumaad dheeri ah, fadlan kala soo xiriir:

Dheepa Pandian, Chief of Communication, UNICEF Somalia, dpandian@unicef.org